


# SUGNAANTA DHAQAALAHA

**Sugnaanta dhaqaalaha wuxuu ku saabsanyahay soo celinta hab-nololeedyada dhibanyaasha colaada hubeysan iyadoo la deegsanaayo hab labadaba ay yihiin kuwa waara sharaftoduna ku ixtiraamantahay.**

La daabacay: 28 Disembar 2015

## GARGAAR DOON LAGU GAARSIIYEY DAD WAXYEELO KA SOO GAARTAY FATAHAADA SHABEELAHA DHEXE




ICRC and Somali Red Crescent Society (SRCS) teams arrive by boat at a village in Middle Shabelle to carry out a food distribution. Access was a challenge for the teams because area roads were submerged. © ICRC/Nur Hassan Gure

Waxaaa la adeegsaday doomo si loo gaaro bulshooyin hafiyey biyaha daadka, Guddiga Caalamiga ee Laanqeyrta Cas (ICRC) iyo Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed (SRCS) waxay in ka badan 16,000 qoysas ku nool hareerahga Webi Shabeelle waxyeelana ka soo gaartay fatahaada u qeybiyeen cunto, agabka guryaha oo lagama maarmaanka ah.

Xilli roobaadka wuxuu sababay in sare u kaco webiga Shabeelle, kana dhashay fatahaad baahsan kaa oo xaaqay jidaka, go'doomiyeyna bulshooyinka sida daran u ugu dhuftay roobka. Waddooyinka biyaha ka sare maray waxay ICRC iyo SRCS u aheyd caqabad dheeraad ah in wax laga qabtana ay adkeyd.



Sandbags are piled along the River Shabelle where the waters broke through. Sandbags were distributed by the ICRC before the onset of the Deyr rains to manage the river flow. © ICRC/Nur Hassan Gure

Alaabta laga keenay doonta waxaa laga qeybiyey lix tuulo oo ku yaalaan gudaha iyo daafaha Degmooyinka Jowhar iyo Balcad, Shabeelaha Dhexe. Qoyskiiba wuxuu helay 50 kg bariis,25 kg digir,10 litar saliida cuntada lagu karsado, 6.5 kg (buskutka tamarta sare) ee BP 5, xirmo ku jirto alaabta fayadhawrka, maacuun, teendho, maro kaneecooyin, derin, baaldiyo iyo kaniinka biyaha lagu nadiifiyo.

Kooxaha ICRC waxay la socdaan deegaanada Jubba iyo Shabeelle oo weli ka da'aya marna da'marna joogsada iyadoo ay aheyd in xilli roobaadka uu dhammaado.




Sl aad u hesho macluumaad dheeri ah oo ku saabsan ICRC-da Soomaaliya booqo **www.blogs.icrc.org/somalia/so**